National Institute for Public Health and the Environment
*Ministry of Health, Welfare and Sport*

RIVM

A. van Leeuwenhoeklaan 9
3721 MA Bilthoven
Postbus 1
3720 BA Bilthoven
www.rivm.nl

T +31 88 689 8989
info@rivm.nl

# Ka difaac ilmahaada dhashay xiiq dheerta. Soo doono tallaalka 22 usbuuc

# Brograamka tallaalka Dowladda

Xiiq dheerta waa cudur aad ugu daran ilmaha dhashay. Ilmahaada dhashay waxaad ka difaaci kartaa xiiq dheerta adiga oo is tallaalaayo inta aad weli uurka leedahay. Waxaa lagu siin karaa tallaalka 22 usbuuc ka bilow usbuucaa 22aad. Tallaalkaasi waxa uu ku jiraa Brograamka Tallaalka Dowladda waana hadaba lacag la'aan. Buuggaan warbixinta ka aqriso dheeraad taasi ku saabsan. Ka eego xitaa 22-week vaccination (maternal whooping cough vaccination).

### Waa maxay xiiq dheerta?
Xiiq dheerta waxaa kaloo xitaa loo yaqaanna '100 maalin oo qufac ah'. Waxaa dhaliyo bakterio. Waxay keentaa qufac daran oo is daba joog ah oo dhowr bilood socon kara. Ilmaha dhashay waak u cabburaan oo neefta ayeey weyn karaan.

### Aad ugu daran ilmaha dhashay
Qatar weyn ayeey xiiq dheerta u leedahay ilmaha dhashay. Waxay ka qaadaan infekshanka sambabaha ama dhaawac maskaxda ah waana xitaa u dhiman karaan. Sannad kasta 170 ilmaha dhashay ah ayaa Nederland la gala cisbitaal cudurka xiiq dheerta.

### Bilaha hore
Carruurta waxaa la siiyaa tallaal ka hortagga xiiq dheerta. Balse waxaa un la siin karaa marka ay dhowr bilood jirsadaan. Waxaa taa macnaheeda yahay in bilahaasi hore dhalashaada keddin aysan difaac ka heysanin xiiq dheerta. Hadaba markaa ayeey leeyihiin nuglaan dheeraad ah.

### Sidee ilmahaada dhashay u difaaci kartaa?
Adiga ayaa iska tallaali kara xiiq dheerta weli inta aad uurka leedahay. Markaa ilmaha dhashay ka bilow maalnta 1 waa difaacan yihiin. Waxaad tallaalka qaadan kartaa ka bilow usbuuca 22aad ee uurka. Halka uu magaca ka yimid tallaalka usbuuca 22. Waxaa lagaa tallaalayaa garabka.

### Sideey u hawl gashaa?
Tallaalka keddib waxaad sameyneysaa curiyeyaal ka hor tag. Kuwaasi iyaga oo sii maraaya madheerta ayeey u gudbayaan ilmaha aan dhalan. Kolkaa ilmahadaa da'da yar waxaa uu yeelanaayaa curieyaal ka hor tag bilaha uugu horreya oo noloshiisa. Ilaa iyo isaga ama iyada uu/ay ka qaadanaayo/neeyso tallaalka. Tallaalka ma difaacaayo ilmahada dhashay oo keli ee xitaa nafsaddaada. Adiga xitaa kuguma dhaceyso xiiq dheerta dad kalena uma gudbin kartid.

**Ilmaha dhashay 1 tallaal ayaa ka dhinmaayo**
Faa'iido kale oo dheeraad ah: haddii aad adiga wakhti dambe is tallaasho, ilmahaada dhashay 1 tallaal ayaa laga dhimaayaa. Markaasi waxaa ilmahaada dhashay waxaa tallaalka kowaad la siinayaa marka uu 3 bilood jir yahay intii 2 bilood lagu siin lahaa*.
* Taasi ma dhacdo mar kasta. Dhakhtarka dhallinyarada ama kalkaalisada caafimaad ayaa taasi kaala hadlaaya. Ka eego xitaa [22-week vaccination (maternal whooping cough vaccination)]

**Naas siinta**
caanaha naaska xitaa waak u jira curiyeyaal ka hor tag. Balse kuwaasi ma difaacaan xiiq dheerta oo keli ah. Xitaa haddii aad ilmahaada naaska siiso, tallaal ayaa loo baahan yahay si ilmahaada uu difaac wacan u helo.

**Isku dhafka tallaalada**
Tallaalka lagu siinaayo waa tallaalka-DKT. Ma kaa difaaceyso oo keli ah xiiq dheerta, balse xitaa laba cudur oo kale: tetanada iyo gowracatada. Ma jiro tallaal u qaas ah xiiq dheerta oo keli ah.

**Ma yahay mid nabadgelyo leh?**
Tallaalka waa mid nabadgelyo u leh ilmahaada dhashay. Taasi cilmi baaris dheer ayaa lagu sameeyay. Waddamada kale dumarka tallaalkaan ilaa wakhti hore ayaa la siin jiray.Tusaale ahaan Ingriiska, Belgiumka, Isbanya iyo Mareykanak.

**Saameynta dheeraadka ah**
Waad kala kulmeysa saameyn dheeraad ah. Sida ku dhegdheg, madax xanuun iyo gacan barar. Saameynahaan dheeraadka ah inta badan waa qafiif waxayna iskood kaaga dhammaanayaan dowr maalmood. Saameyno dheeraad ah oo daran aad ayeey ugu yar yihiin.

**Diiwaan gelinta saameynta dheeraadka ah**
waxa aad saameynta dheeraadka ah ka diiwaan gelin kartaa dhakhtarka ama kalkaalisada caafimaad oo tallaalka ku siisay. Iyaga ayaa saameynta dheeraadka ah u sii gudbin doono Xaruunta Saameynta Dheeraadha Lareb. Adiga ayaa xitaa saameynta dheeraadka ah iskaa u gudbin kara Lareb adeegso www.lareb.nl. taasi waxaad xitaa ku gudbin kataa website-ka rijksvaccinatieprogramma.nl.

**Halkee?**
Marka aad dooneyso in aad is tallaasho waxaad ballan ka sameysaneysaa Xafiiska Korrinka carruurta. Isla markaana waxaa xitaa lagu siinayaa sharraxaada tallaalada ilmahaada aan dhalan laga siin doono hadhow Brograamka Tallaalka Dowladda. Barta [22-week vaccination (maternal whooping cough vaccination)] waxaad ka raadsan kartaa goobta aad ballan ka sameysan  karto.

**Goorma?**
Tallaalka waxa aad soo doonan kartaa ka bilow usbuuca 22$^{aad}$ ee uurkaada ilaa iyo inta aad ka dhaleyso inta u dhexeeysa. Waxaase jirta: ka bilow usbuuc 22$^{aad}$ waxaa wacnaata badan tahay sida aad ugu soo degdegto.

**Lacag la'aan**
Tallaalka usbuuca 22 waxa uu soo hoos gelayaa Brograamka Tallaalka Dowladda hadaba waa lacag la'aan.

**Macluumaadka la xiriira tallaalka**
Keddib marka tallaalka lagu siiyo, Daryeelka Caafimaadka Dhallanka (JGZ) ayaa macluumaadka tallaalka ku diiwaan gelineysa habka-JGZ iyo caddeyntaada tallaalka. Haddii aad u oggolaato JGZ waxay macluumaadka la wadaageysaa RIVM. Waa macluumaadka tallaalka iyo astaamaha gaaka ah ee ilmahaada. Dhakhtarka dhallanka-ama kalaalisada caafimaad ee JGZ ayaa oggolaashadaada ku weydiinaayo in maclumaadka ay JGZ iyo RIVM ay is dhaafsan karaan.
Hey'adda Dowladda ee Caafimaadka Dadweeynaha iyo Dabeecadda (RIVM) ayaa isku dubaridda Brograamka Tallaalka Dowladda ee Nederland. RIVM ayaa waalidka ka siineysa warbixin la xiriirta tallaalada ee Brograamka Tallaalaka Dowladda iyadaana soo direysa casuumadaha tallaalka. Daryeelka Caafimaadka Dhallanka (JGZ) ee nawaaxiga waxa ay fulineysaa Brograamka Tallaalaka Dowladda bixineysana tallaalada.
Oggolaashadaani waa muhiim. RIVM waxay hawl gallo kala duwan (si wacan) u fulin karaan marka la ogyahay tallaalada dhab ahaantii ilmahaada la siiyay. RIVM waxa ay macluumaadka u adeegsaneysaa usaale ahaan in wakhtiga sax ah laguu soo diro xusuusinta tallaalada ilmahaada. Waxaa barbar socda in ay RIVM ay ku siin karto koobi oo caddeynta tallaalada ilmahaada haddii aad taasi ka codsato. Waa mid laga faa'iideysan karo marka aad safar galeyso aadna rabto in aad ogaato cudurrada aad ka tallaalan tahay.
RIVM waxay kaloo macluumaadkaasi u adeegsan kartaa in tayada Brograamka Tallaalaka Dowladda ay ilaaliso. Ugu dambeeynta waxa ay RIVM u adeegsaneysaa macluumaadka in ay xisaabiyaan tirada carruurta Nederland oo la siiyaay tallaalada oo wada dhan. Haddii cudur faafa uu dillaco, waxaa dhab ahaantii aad muhiim u ah in la ogyahay tirada dadka difaac ka heysta taasi. Markaa RIVM waxa ay qiimeyn kartaa in cudurka uu faafi doono iyo ama in xeer nidaamedyo loo baahan yahay.
Warbixin dheeraad ah ka eego rijksvaccinatieprogramma.nl/jouw-toestemming

**Tani waxaa soo saaray:**
**Rijksinstituut voor Volksgezondheid en Milieu**
**Postbus 1 | 3720 BA Bilthoven**
**www.rivm.nl**
**jannaayo 2022**

**Daryeelka berrito maanta ayuu bilowdaa**